**WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA**

WASAARADDA QORSHEYNTA QARANKA

# WARSIDAHA BISHA FEBRAAYO 2026



## HORDHAC

Bisha **Febraayo 2026**, Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxay sii xoojisay doorkeeda hogaamineed ee isku-duwidda horumarka qaranka, iyadoo diiradda saartay waafajinta mashaariicda iyo taageerada caalamiga ah ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Intii lagu guda jiray bishan, Wasaaraddu waxay qabatay shirar heer sare ah, kulamo wadatashi, iyo aqoon-isweydaarsiyo istiraatiiji ah oo lagu xoojinayo amniga cuntada, adkeysiga bulshada, nidaamyada kormeerka iyo qiimaynta, iyo horumarinta maalgashiga. Dadaalladan waxay muujinayaan sida Dowladda Federaalka Soomaaliya uga go'an tahay horumar waara, isla-xisaabtan, iyo koboc dhaqaale oo loo dhan yahay.

## Wasaaradda Qorsheynta Qaranka oo soo bandhigtay natiijada mashaariicda WFP ee sannadkii 2025




**22-ka Febraayo 2026** – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya (WQM&HDH), ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay shirka dib-u-eegista sannadlaha ah ee mashaariicda ay Hay'adda Cunnada adduunka (WFP) ka fulisay dalka muddadii u dhexeysay Janaayo ilaa Diseembar 2025.

Shirkan waxaa si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamed Shire, waxaana goobjoog ka ahaa mas'uuliyiin ka socday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, wasaaradaha kale ee dowladda, iyo mas'uuliyiin sare oo ka socday WFP oo ay hoggaaminaysay Ku-xigeenka Madaxa Barnaamijyada ee Xafiiska WFP ee Soomaaliya, Michele Kiermeier.

Ujeeddada ugu weyn ee kulankan ayaa ahayd in si dhab ah loogu kuur-galo waxqabadka mashaariicda WFP, iyadoo la eegayo saameynta ay ku yeesheen bulshada. Waxaa si gaar ah xoogga loogu saaray sidii loo xaqiijin lahaa in barnaamijyadan ay si buuxda u waafaqsan yihiin Qorshaha Isbeddelka Qaranka (National Transformation Plan - NTP).

Intii uu shirku socday, waxaa la lafo-guray sida ay WFP gacan uga geysato hiigsiga guud ee qaranka (National Agenda), iyadoo laga gudbayo gurmadka degdega ah loona gudbayo mashaariic sal-ballaaran oo dhisaya adkeysiga bulshada iyo kobaca dhaqaalaha, taas oo qayb ka ah qorshaha fog ee ay dowladda Soomaaliya ku hagayso horumarka dalka.

Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire, ayaa hoosta ka xariiqay muhiimada ay leedahay in deeqaha caalamiga ah loo agaasimo qaab waafaqsan mudnaanta dowladda.

"Dowladdu waxay xoogga saaraysaa in mashaariicda aan la fulinayno hay'adaha caalamiga ah ay noqdaan kuwo hufan, natiijo leh, isla markaana gacan ka geysta horumarka waara ee dalka, iyagoo si toos ah u xoojinaya hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP)," ayuu yiri Agaasime Shire.

Warbixinnada shirka lagu soo bandhigay waxay taabanayeen qaybo muhiim ah oo ay ka mid yihiin: Kormeerka ku saleysan Natiijada (Result Based Monitoring): Qiimeyn lagu sameeyay halka ay mashaariicdu gaareen iyo isbeddelka dhabta ah ee ay nolosha dadka ku keeneen. Wada-shaqeynta Hay'adaha Dowladda: Warbixinnada heshiisyada (LOAs) ee u dhaxeeya WFP iyo Wasaaradaha dalka si loo xoojiyo lahaanshaha qaranka. Caqabadaha Jira: Sidii looga gudbi lahaa caqabadaha amni iyo kuwa deegaan ee saameeya bixinta adeegyada.

Kulanka ayaa lagu soo afmeeray qorshe-hawleed lagu xoojinayo wada-shaqeynta dowladda iyo WFP ee sannadka 2026. Waxaa la isku raacay in kor loo qaado tayada kormeerka, lana hubiyo in kaalmo kasta oo dalka soo gasha ay qayb ka noqoto dhismaha mustaqbalka fog iyo adkeysiga dadka Soomaaliyeed, iyadoo la raacayo jihada uu jeexay Qorshaha Isbeddelka Qaranka.



## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta oo kulan la yeeshay dhiggiisa Arrimaha Gudaha



2**1-ka Febraayo 2026** - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), Mudane Maxamed Shire, ayaa xarunta Wasaaradda ku qaabilay dhiggiisa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta (MOIFAR), Mudane Cabdulqaadir Cilmi Cali, iyo wafdi uu hoggaaminayay.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray suurta-galnimada ballaarinta mashaariicda ay fuliso MOIFAR ee laga maalgeliyo Sanduuqa Wadajirka ah ee Soomaaliya (Somali Joint Fund – SJF), iyo xoojinta iskaashiga ku aaddan la falgelka deeq-bixiyeyaasha iyo raadinta dhaqaale hor leh.

Labada dhinac waxay adkeeyeen muhiimadda ay leedahay xoojinta isku-duwidda hay'adaha dowladda si loo hubiyo fulin wax-ku-ool ah, hufnaan maaliyadeed, iyo waafajinta mashaariicda mudnaanta horumarineed ee qaranka.

## Agaasimaha Maalgashiga oo la kulmay Maalgashato Shiineys ah



**18-ka Febraayo 2026** - Agaasimaha Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Dubo ayaa kulan la qaatay maalgashato Shiineys ah oo muddo ka badan 10 sano ka shaqeynayay Soomaaliya, kana hirgeliyay maalgashi guuleystay oo ku saabsan dhismaha iyo warshadaynta cunnada iyo cabbitaannada.

Kulankan waxaa diiradda lagu saaray sidii loo ballaarin lahaa maalgashigaas, loona abuuri lahaa fursado shaqo oo dheeraad ah, loona kordhin lahaa wax-soo-saarka gudaha si loo xoojiyo dhoofinta.

Tallaabadan waxay qayb ka tahay hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), oo mudnaanta siinaya casriyeynta kaabayaasha dhaqaalaha iyo kobcinta warshadeynta wax-soo-saarka dalka.

Soomaaliya waxay si tartiib ah ugu soo baxeysaa suuq furan oo soo jiidanaya maalgashi caalami ah iyo koboc dhaqaale.

## Wafdi Ballaaran oo Daneeyayaal Kala Duwan ka Kooban oo Kormeeray Mashruuca JRP 2.0 ee Galmudug



**18-ka Febraayo 2026** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya (WQM&HDH), oo kaashanaysa Wasaaradda Qorsheynta ee Dowlad-Goboleedka Galmudug, ayaa 13–18 Febraayo ka fulisay Dowlad-Goboleedka Galmudug kormeer shaqo oo lagu booqday xarumaha uu ka socdo Mashruuca JRP 2.0, kuwaas oo ku kala yaalla magaalooyinka Cadaado, Dhuusamareeb iyo Gaalkacyo.

Kormeerkan shaqo waxaa ka qeyb galay daneeyayaal muhiim ah, oo ay ka mid yihiin wasaaradaha Galmudug ee ku lugta leh mashruuca, hay'adaha Qaramada Midoobay sida UNICEF iyo Hay'adda Cunnada Adduunka (WFP), iyo bahwadaagta fulinta mashaariicda. Ujeeddada kormeerku waxay ahayd in si dhow loo qiimeeyo heerka uu marayo fulinta mashaariicda, isla markaana la xoojiyo wada-shaqeynta, isku-duwidda iyo isla-xisaabtanka howlaha mudnaanta u leh bulshada.

Intii uu socday kormeerku, wafdigu wuxuu booqday goobaha mashaariicda laga hirgelinayo, oo ay ku jiraan xarumaha caafimaadka (xarumaha hooyada iyo dhallaanka iyo isbitaallada), dugsiyada, kaabayaasha biyaha, iyo goobaha taageera nolol-maalmeedka. Booqashooyinkaas ayaa suurtageliyay in si toos ah loola kulmo ka-faa'iideystayaasha, wakiillada bulshada iyo mas'uuliyiinta maxalliga ah, si loo helo xog iyo aragti dhab ah oo ku saabsan saameynta mashaariicdu ku leeyihiin nolosha dadka.

Kormeerku wuxuu si gaar ah diiradda u saaray tayeynta adeeg bixinta, saameynta heer bulsho, waxqabadka fulinta, iyo caqabadaha jira. Natiijooyinka laga helay booqashooyinka goobaha ayaa muujiyay horumar muuqda oo la gaaray, isla markaana tilmaamay meelaha u baahan in la sii xoojiyo, gaar ahaan dhinacyada taageerada farsamo iyo midda maaliyadeed, si loo hubiyo in barnaamijyadu noqdaan kuwo wax-ku-ool ah, waara, isla markaana si buuxda uga jawaaba baahiyaha bulshada.



## Shirka Xoojinta Nidaamka Kormeerka iyo Qiimaynta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka




**17-ka Febraayo 2026** - Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Aadan Maxamed, ayaa soo xiray Shirkii Xoojinta Nidaamka Kormeerka iyo Qiimaynta ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) oo ka dhacay Muqdisho 16-17 Febraayo 2026.

Shirka oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, waxaa ka qaybgalay 25-ka wasaaradood ee Dowladda Federaalka, Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Madaxtooyada Qaranka. Waxaa diiradda lagu saaray xoojinta wada-shaqaynta hay'adaha, isku-dubaridka shaqooyinka, iyo mideynta habraacyada kormeerka iyo qiimaynta si loo hubiyo hirgelinta wax-ku-oolka ah ee NTP.

Mas'uuliyiintii ka hadlay kulanka ayaa adkeeyay in guusha qorshayaasha qaran ay ku xirantahay isku-xirnaan hay'adeed, wada-shaqayn joogto ah, iyo nidaam mideysan oo soo saara natiijooyin la cabbiri karo. Shirka ayaa sidoo kale lagu falanqeeyay dhammaystirka qaab-dhismeedka K&Q iyo xoojinta isla-xisaabtanka iyo tayada xogta.



## Wasaaradda Qorsheynta oo Dardargelisay Qorshaha Ka-hortagga Cunto-yarida iyo Nafaqo-xumada, iyadoo laga jawaabayo Abaaraha dalka



**16-ka Febraayo 2026** - Iyadoo laga jawaabayo xaaladda abaaraha ee dalka ka jirta, Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay kulan wadatashi ah oo lagu dardargelinayo diyaarinta Qorshaha Ka-hortagga Cunto-yarida iyo Nafaqo-xumada, kaasoo haatan maraya heer gabagabo.

Kulanka waxaa shir-guddoominayay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, waxaana ka qaybgalay mas'uuliyiin ka socday Wasaaradaha Beeraha, Xoolaha, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Khayraadka Biyaha, iyo sidoo kale Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Qaranka (SoDMA).

Qorshahan ayaa gogol-xaar u ah kulan heer sare ah oo u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo saaxiibbada caalamka, si loo xoojiyo iskaashiga, loo mideeyo dadaallada, loona dardargeliyo tallaabooyinka wax-ku-oolka ah ee lagu yaraynayo saameynta cunto-yarida iyo nafaqo-xumada ka dhalatay abaaraha.

## Aqoon-is-weydaarsi ku saabsan isku-duwidda Qorshaha Isbeddelka iyo waafajinta Qorshe-Hawleedka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda Galmudug ee sannadka 2026.




**14-ka Febraayo 2026** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo kaashaneysa Wasaaradda Qorsheynta Galmudug, ayaa magaalada Dhuusamareeb ku soo gabagabeysay aqoon-isweydaarsi saddex maalmood socday oo diiradda lagu saaray isku-duwidda Qorshaha Isbeddelka iyo waafajinta Qorshe-Hawleedka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda Galmudug ee sannadka 2026. Kulankan ayaa sidoo kale lagu xoojiyay wada-shaqeynta istiraatiijiyadeed ee Wasaaradaha Qorsheynta ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

Aqoon-isweydaarsiga waxaa ka qeybgalay Agaasimayaal Guud, Agaasimayaasha Qorsheynta iyo khubaro farsamo oo ka socday wasaaradaha Galmudug, kuwaas oo falanqeeyay baahiyaha mudnaanta leh, caqabadaha jira—gaar ahaan saameynta abaarta baahsan—iyo sida loo dejin karo qorshe mideysan oo wax looga qabto duruufaha taagan. Waxaa si gaar ah loo adkeeyay in qorshe-hawleedyada sannadlaha ah si buuxda ula jaanqaadaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo Qorshaha Isbeddelka Galmudug, iyadoo xoogga la saarayo tayeynta aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaha qorsheynta.

Ugu dambeyntii, kulanka waxaa laga soo saaray qabyo-qoraalka Qorshe-Hawleedka Galmudug ee 2026, kaas oo hagaya hirgelinta mashaariicda iyo adeegyada horumarineed ee dowlad-goboleedka. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Galmudug ayaa si rasmi ah u xiray kulanka, wuxuuna ku bogaadiyay ka-qeybgaleyaasha dooddii qotada dheereyd iyo soo bandhigista mudnaanta iyo caqabadaha jira, isaga oo carrabka ku adkeeyay baahida loo qabo in la joogteeyo kulamo noocan oo kale ah si loo dardargeliyo dhammaystirka qorshe mideysan oo wax ku ool ah.



## Wasiirka Qorsheynta iyo WFP oo Ka Wada-hadlay Dardargelinta Gurmadka Abaaraha iyo Isku-xirnaanta NTP 2025–2029



**14-ka Febraayo 2026 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Mohamud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), oo uu wehliyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, ayaa kulan mirodhal ah la yeeshay Wakiilka Hay'adda WFP ee Soomaaliya, Mudane Hameed Nuru.

Kulankan ayaa yimid xilli Soomaaliya ay wajaheyso xaalad abaaro sii xumaaneysa kadib roobabkii la filayay oo baaqday, kuwaas oo si toos ah u saameeyay sugnaanta cuntada, maciishadda qoysaska nugul, iyo adkeysiga bulshooyinka ku nool miyiga iyo magaalooyinka.

Intii uu socday kulanka, waxaa diiradda lagu saaray dardargelinta iyo ballaarinta gurmadka badbaadinta nolosha dadka iyo xoolaha, is-waafajinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (#NTP2025_2029) iyo Qorshaha Istiraatiijiyadda Dalka ee WFP (2026–2030) si loo xaqiijiyo isku-xirnaan istiraatiiji ah iyo wada-shaqeyn wax ku ool ah, iyo xoojinta iskaashiga hay'adaha qaranka iyo WFP si loo gaaro go'aanno ku saleysan xog sugan, mudnaanta qaranka, iyo natiijooyin la taaban karo.

Wasiirka ayaa hoosta ka xariiqay in Dowladda Federaalka Soomaaliya ay ka go'an tahay in gurmadka degdegga ah lagu lammaaniyo xalal waara oo xoojiya adkeysiga bulshada, korna u qaada sugnaanta cuntada iyo soo kabashada dhaqaale ee qoysaska ay abaaruhu saameeyeen, halka Wasaaradda Qorsheyntuna ay sii wadi doonto doorkeeda hoggaamineed ee isku-duwidda dadaallada qaranka iyo kuwa saaxiibada caalamiga ah si loo hubiyo in taageerada la bixiyo ay si buuxda ula jaanqaaddo mudnaanta Qaranka iyo hiigsiga horumar waara.



## Agaasimaha Guud iyo Safiirka Jamhuuriyadda Kuuriya oo ka wadahadlay Xoojinta Iskaashiga Bini'aadantinimo



13-ka Febraayo 2026 - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), Mudane Maxamed Shire, ayaa magaalada Nairobi kulan kula yeeshay Mudane Kang Hyung-Shik, Safiirka Jamhuuriyadda Kuuriya u qaabilsan Soomaaliya, si loo sii xoojiyo iskaashiga istiraatiijiyadeed ee bini'aadantinimo ee u dhexeeya labada dal. Kulanka waxaa ku weheliyay Ku-xigeenka Safiirka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya u fadhiya Jamhuuriyadda Kenya, Mudane Mukhtaar Mahad Daud.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xaaladda sii adkaaneysa ee abaaraha iyo cunno-yaraanta ka jirta dalka, kadib roobabkii Deyrta 2025 oo baaqday, kuwaas oo noqday kuwii ugu hooseeyay afartan sano ee la soo dhaafay. Soomaaliya waxay weli wajahaysaa saddex caqabad oo isbiirsaday: abaar ka dhalatay isbeddelka cimilada, cunno-yari baahsan, iyo hoos u dhac ku yimid maalgelinta caalamiga ah ee saameeyay howlaha gargaarka bini'aadantinimo.

Intii uu kulanku socday, waxaa si gaar ah loo xusay taageerada nooca raashinka ah (qaybinta bariiska) ee Dowladda Jamhuuriyadda Kuuriya, taas oo lagu tilmaamay faragelin naf-badbaadin ah oo si toos ah u gaareysa bulshooyinka nugul.

Doodda ayaa sidoo kale taabatay xaddidaadaha dhaqaale ee haysta Barnaamijka Cunnada Adduunka ee Qaramada Midoobey (World Food Programme), kaas oo si weyn u dhimay baaxadda kaalmada uu bixiyo, inkastoo baahiyaha bini'aadantinimo ay sii kordhayaan.

Kulankan wuxuu daba socday booqashadii Agaasimaha Guud uu sanadkii hore ku tagay Jamhuuriyadda Kuuriya, halkaas oo uu kula kulmay mas'uuliyiin ka tirsan Hay'adda Iskaashiga Caalamiga ah ee Kuuriya (KOICA) iyo Wasaaradda Beeraha, intii ay socotay Madasha Busan 2025. Wadahadalladaas ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga horumarineed, adkeysiga beeraha, iyo dhismaha awoodda hay'adaha qaranka ee muddada dheer.

Labada dhinac ayaa mar kale xaqiijiyey ka go'naanshahooda wadajirka ah ee taageerada degdegga ah ee bini'aadantinimo, iyagoo sidoo kale xoogga saaraya horumarinta nidaamyo cunno oo waara iyo dadaallada dib-u-soo kabashada dhaqaalaha.

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay si qoto dheer u bogaadineysaa iskaashiga sii kobcaya ee ay la leedahay Jamhuuriyadda Kuuriya, gaar ahaan xilligan xasaasiga ah ee dalka uu wajahayo caqabado isbiirsaday.

## Agaasimaha Guud oo Ka Qaybgalay Todobaadka Ganacsiga Soomaaliya–Kenya, Dhiirrigeliyayna Maalgashi iyo Iskaashi Dhaqaale oo Waara




**12-ka Febraayo 2026-** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa ka qeybgalay bandhigga Todobaadka Ganacsiga Soomaaliya–Kenya iyo Qurbojoogta, oo ka furmay magaalada Nairobi.

Madashan muhiimka ah waxay ahayd fursad lagu xoojinayo iskaashiga dhaqaale ee labada dal, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo doorka ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo qurbojoogta Soomaaliyeed. Intii lagu guda jiray bandhigga, Agaasimaha Guud wuxuu ka qeybgalay doodaha, isaga oo ka jawaabay su'aalo la xiriiray jihada istiraatiijiyadeed ee dhaqaalaha dalka, gaar ahaan horumarinta maalgashiga, kobcinta ganacsiga xuduudaha isaga gudba, iyo dardargelinta kobaca dhaqaale oo loo dhan yahay.

Agaasimaha Guud ayaa hoosta ka xarriiqay in Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ay ka go'an tahay xoojinta dadaallada lagu hagaajinayo jawiga maalgashiga dalka, lana dhiirrigelinayo maalgashi wax-soo-saar leh oo horseeda shaqo-abuur, kordhinta dakhliga, iyo kobac dhaqaale oo waara — si waafaqsan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025–2029).

## MoPIED iyo UNDP oo Muqdisho Ku Yeeshay Shir Heer Sare ah oo Lagu Xoojinayo Iskaashiga iyo Hirgelinta Qorshayaasha Horumarineed



**5-ta Febraayo 2026-** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire, oo ay weheliyaan Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha Qorshaynta ee Dawlad Goboleedyada Jubbaland, Mudane Maxamed Weli Sheekh Cali, iyo Galmudug, Mudane Cabdullaahi Cumar Aadan (Sakiin), ayaa Muqdisho ku yeeshay shir heer sare ah oo ay la qaateen Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Horumarinta (UNDP).

Shirka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga shaqo, dardargelinta hirgelinta qorshayaasha horumarineed, tayaynta hay'adaha heer Dawlad Goboleed, iyo kor u qaadista waxtarka iyo wax-ku-oolnimada barnaamijyada.

Marwo Shaila Khan, oo hoggaaminaysay dhinaca UNDP, ayaa uga mahadcelisay Agaasimaha Guud Mudane Maxamed Shire isku-dubbaridka shirka, iyadoo adkaysay mudnaanta ay UNDP siinayso la-shaqaynta Dawlad Goboleedyada Jubbaland iyo Galmudug, isla markaana xaqiijisay ballanqaadka UNDP ee ah in la laba-jibbaaro dadaallada wada-shaqayn si loo gaaro natiijooyin waara oo muuqda.

## Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta iyo CISP oo Xoojinaya Iskaashiga Isla-xisaabtanka iyo Hufnaanta Mashaariicda Horumarineed



4-ta Febraayo 2026- Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Hay'adda CISP Soomaaliya ayaa Muqdisho ku yeeshay kulan lagu xoojinayay iskaashiga dhinaca Kormeerka iyo Qiimaynta. Kulanka ayaa diiradda lagu saaray kor u qaadista isla-xisaabtanka, daahfurnaanta, wadaagga xogta, iyo hufnaanta fulinta mashaariicda horumarineed.

Kulanka waxaa shir-guddoomiyay Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, waxaana lagu falanqeeyay hirgelinta Siyaasadda Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimaynta, iyo hubinta in mashaariicda ay si buuxda ula jaanqaadaan mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka. Kulankan ayaa qeyb ka ah dadaallada Wasaaradda ee lagu xoojinayo nidaamyada kormeerka, qiimaynta, iyo warbixinta si loo xaqiijiyo horumar waara.

## Wasaaradda Qorsheynta iyo FAO oo Qabtay Kulan Wadatashi ah oo ku Saabsan CPF 2026–2030



**3-da Febraayo 2026 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH), oo kaashaneysa Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO), ayaa qabatay kulan wadatashi ah oo ku saabsan Qaab-dhismeedka Barnaamijka Dalka ee FAO (CPF) 2026–2030.

Kulankan waxaa si rasmi ah u furay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamed Shire, waxaana ka soo qeyb galay wasaarado kala duwan oo ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad-Goboleedyada. Doodaha kulanka ayaa diiradda saaray sidii mudnaanta istiraatiijiyadeed ee FAO loo waafajin lahaa Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo Qaab-dhismeedka Iskaashiga Qaramada Midoobay.

Ka-qeybgalayaashu waxay yeesheen dood furan iyo shaqo-kooxeedyo lagu aqoonsaday mudnaanta waaxyaha kala duwan, isla markaana lagu soo jeediyay talooyin wax ku ool ah oo lagu xoojinayo amniga cuntada, horumarinta beeraha, iyo adkaysiga bulshooyinka.

Kulankan wuxuu muujinayaa sida Dowladda Soomaaliya uga go'an tahay qorsheyn ku dhisan caddeyn, isku-duwid wax ku ool ah, iyo iskaashi adag si loo gaaro horumar waara.



## Shir Lagu Mideynayo Dadaallada Amniga Cuntada iyo Nafaqada



**2-da Febraayo 2026 —** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa martigelisay shir heer sare ah oo ka dhacay xarunta Wasaaradda ee Muqdisho, kaas oo diiradda lagu saaray kormeerka, la-socodka, iyo xoojinta isku-duwidda Amniga Cuntada iyo Nafaqada dalka, xilli ay gobollo ka mid ah dalka ka jiraan abaaro daran oo halis gelinaya nolosha dadka iyo duunyada.

Shirka waxaa guddoomiyay Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), waxaana ka soo qayb galay Wasiirka Beeraha iyo Waraabka, Mudane Maxamed Cabdi Xayir (Maareeye); Wasiirka Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, Mudane Xasan Xuseen Maxamed (Eelaay); Wasiirka Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, Mudane Cabdullaahi Bidhaan Warsame; Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah, Mudane Axmed Xasan Aadan; Wasiir Ku-Xigeenka Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, Dr. Maxamed Xasan Maxamed; Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Qaranka (SoDMA), Mudane Maxamuud Macallin Cabdulle, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamed Shire, iyo Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha ay khuseyso, oo ay ka mid yihiin, Arrimaha Gudaha, Istaatistikada, Beeraha, iyo Xanaanada Xoolaha, iyo saraakiil sare oo ka socday xafiiska Ra'iisul Wasaaraaha iyo Wasaaradda Deegaanka iyo Cimilada.

Ugu horreyn, Wasiirka Qorsheynta Qaranka ayaa faahfaahiyay ujeeddooyinka shirka, isaga oo adkeeyay muhiimadda ay leedahay helitaanka xog la isku hallayn karo, iskaashi hay'adeed oo wax ku ool ah, iyo qorsheyn ku saleysan caddeyn, si si hufan looga jawaabo caqabadaha amniga cuntada iyo nafaqada, loona yareeyo saameynta abaaraha.

Intii uu socday shirka, Hay'adda SoDMA ayaa soo bandhigtay xaaladdii ugu dambeysay ee abaarta, halka WQM&HDH ay soo jeedisay Qorshaha Amniga Cuntada iyo Nafaqada. Waxaa sidoo kale laga dooday xoojinta isku-duwidda hay'adaha dowladda, magacaabista isku-xirayaal, iyo xaqiijinta iyo mideynta xogta tirakoobka, oo ay hoggaamineyso Hay'adda Istaatistikada Qaranka.

Gunaanadkii shirka, ka-qaybgalayaashu waxay isla garteen joogteynta kulammada la xiriira Amniga Cuntada iyo Nafaqada, xoojinta la-shaqeynta saaxiibada caalamiga ah, iyo dejinta qodobbo taabagal ah oo ay fulinayaan hay'adaha ay khuseyso, iyadoo Wasaaradda WQM&HDH hoggaaminayso isku-duwidda guud ee dadaallada qaranka.



## Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta iyo Ku-xigeenka Wakiilka UNICEF ee Soomaaliya oo ka Wada Hadlay Xoojinta Iskaashiga Labada Dhinac



**1-da Febraayo 2026 –** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Shire, ayaa kulan la yeeshay Mudane Nisar Syed, Ku-xigeenka Wakiilka Hay'adda UNICEF Soomaaliya, oo booqasho ku yimid xarunta Wasaaradda.

Kulankan ayaa ujeedkiisu ahaa xoojinta iskaashiga u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Hay'adda UNICEF, iyo sii adkaynta wada-shaqeynta dhinacyada qorsheynta, kormeerka, iyo qiimeynta, iyo hirgelinta barnaamijyada horumarineed iyo kuwa bini'aadantinimo.

Intii uu kulanku socday, labada dhinac waxay si gaar ah uga wada hadleen is-waafajinta Barnaamijka Dalka ee UNICEF Soomaaliya (Country Programme Document – CPD 2026–2030) iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (National Transformation Plan – NTP 2025–2029), si loo hubiyo in dhammaan faragelinnada UNICEF ay si toos ah ugu adeegaan mudnaanta horumarineed ee qaranka.

Sidoo kale, kulanka waxaa lagu falanqeeyay arrimaha la xiriira ururinta kheyraadka (resource mobilisation), iyadoo diiradda la saaray sidii loo xoojin lahaa taageerada barnaamijyada bini'aadantinimo, gaar ahaan kuwa quseeya carruurta, haweenka, iyo bulshooyinka nugul ee dalka.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta ayaa hoosta ka xarriiqay muhiimadda ay leedahay in dhammaan hay'adaha caalamiga ah ay ku shaqeeyaan qaab isku-xiran, isla markaana barnaamijyadoodu ay waafaqsanaadaan qorshayaasha iyo istiraatiijiyadda horumarineed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Dhankiisa, Mudane Nisar Syed ayaa muujiyay sida UNICEF uga go'an tahay sii wadidda iyo xoojinta iskaashiga ay la leedahay Dowladda Soomaaliya, isagoo adkeeyay in UNICEF ay diyaar u tahay inay taageerto hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka, gaar ahaan dhinacyada la xiriira carruurta, adeegyada aasaasiga ah, iyo adkeysiga bulshooyinka.

Kulanka ayaa ku soo dhammaaday is-afgarad ku aaddan in la sii xoojiyo wada-shaqeynta istiraatiijiyadeed, lana dardargeliyo isku-dubaridka dadaallada horumarineed si loo gaaro natiijooyin waara oo wax ku ool ah oo u adeegaya shacabka Soomaaliyeed.